Waaxda Nabad-Ilaalinta Dalka Mareykanka Qorshaha Marin-u-Helka Luqadda

Soo Koobid

Muuqaalka Guud

Waaxda Nabad-Ilaalinta Dalka Mareykanka (Department of Homeland Security, DHS) Qorshaha Marin-u-Helka Luqadda (Qorshaha LEP) ayaa oofineysa shuruudda Xeer Fulinta 13166, ee ah *Horumarinta Marin-u-Helka Adeegyada loogu talagalay Dadka Aqoontada Ingiriisigu XaddidanTahay* (Limited English Proficiency, LEP) (Ogast 11, 2000). Qorshaha LEP ayaa dhidbaya xeer marin-uhel luqad oo loogu talagalay Waaxda waxayna abuureysa nidaam lagu siiyo marin u hel waxtar u leh dadka u baahan LEP markay tahay gudaha Waaxda Nabad-Ilaalinta Dalka Mareykanka (DHS). Qorshaha LEP ayaa sifeeeya waxqabadyada haatan jira ee marin-u-helka luqadda iyo tallaabooyinka dheeraadka ah ee DHS ay ka qaadi doonto sidii ay u horumarin lahayd oo ay u kordhin lahayd adeegyaada luqadda loogu talagalay shaqsiyaada LEP ee ka tirsan dhammaan hawlaha, adeegyada, barnaamijyada, iyo waxqabayada DHS.

Markii la soo saarayay Qorshaha LEP, ayay Qaybaha DHS qiimeeyeen illaa heerka ay dadka ka tirsan LEP ay marin-ugu –lahaayeen barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, oo tixgaliyeen talooyinkii ka yimid ururrada dibadda sidii loo horumarin lahaa marin-u-helka , oo ballamo ku qaadeen sidii tallaabooyin dheerad loogu qaadi lahaa sidii loo sii lahaa marin waxtar u lah dadka ku jira Qorshaha LEP. Iyada oo shaqo ahaan adeegsaneysa Qorshaha LEP, Qaybaha DHS ayaa soo saari doona qorshooyin marin-u-hel gaar ah, oo faafin doona habsocoyada sidii loo garan lahaa dadka Qorshaha LEP iyo sidii loo heli lahaa adeegyada luqadda, looguna tabbbari lahaa shaqaalaha mas'uuliyadaha marin-u-helka luqadda, iyo sidii loo wargalin lahaa dadweynaha ilaha luqadda ee la heli karo, iyo si joogto ah loo qiimeeyo oo loo cusbooneysiiyo qorshayaasha. Xafiiska Xuquuqda Madaniga iyo Xoriyadaha Madaniga (Office for Civil Rights and Civil Liberties, CRCL) ayaa kormeeri doona hirgalinta Qorshaha LEP.

Ujeeddo

Waa ujeeddada DHS inay siiso marin-u-hel wax ku ool leh shaqsiyaada aqoonta Ingiriisiga xaddidan ku leh hawlaha, adeegyada iyo waxqabadyada, iyo barnaamijka taageera hadaf mawduuc DHS iyada oo ku bixisa caawimo luqadeed tayo leh wakhtiga habboon. Sidaas darted, Qaybaha DHS waa inay ku daraan xeeladahooda caadiga ah iyo qorsheyntooda meherad tixgalimaha marin-u-helka luqadda , oo ay tilmaaamaan oo ku tarjumaan dukumentiyada muhiimka ah luqadaha badiyaa lala kulmo, ku bixiyana adeegyada turjumaadda meelaha ay ku habboon tahay, oo ay shaqaalaha ku tacliimiyaan arrimaha ku saabsan mas'uuliyadaha marin-u-helka luqadda iyo sida loo istcimaalo ilaha marin-u-helka luqaddda ee la heli karo.

Qorshooyinka iyo Waxqabadyada Qaybaha ee LEP

Sannadkan 2012, Qayb kasta oo ka mid ah DHS iyaga oo la leh xiriir dadweynaha waxa looga baahan yahay inay soo saaraan Qorshe Marin-u-hel Luqad si buuxda ugu qaybgalineysa ujeeddada DHS ee LEP u dhigbay qorshahani.

Markii ay u diyaar garoobayeen Qorshahan LEP ayay Qayb kastaa bilowday inay qaddariso dariiqooyinkii ay karti ugu yeelan lahayd inay:

- Kordhiso siinta adeegyada afcelinta iyo tarjumaadda iyaga oo qayb si joogto ah uga mid ah socodsiinta barnaamijyada iyo hawlaha;
- Kordhiso gacn u fidinta dadyowga Qorshaha LEP sidii looga siin lahaa macluumad barnaamijyada nabad-ilaalinta dalka**.**
- Raad-raacdo la kulanka shaqsiyaada LEP si loo garto baahiyada xaadirkan iyo mustaqbalakaba ee loogu talagalay adeegyada luqadda;
- Isticmaasho waxyaabaha CRCL ee "Waxaan Ku Hadlaa" si loo fududeeyo garashada luqadaha aya ku hadlaan dadka LEP ee lala kulmo;
- Xaddidaan u isticmaalka xubnaha qoyska, saaxiibbada, ama dadka kale ee ay isku xiran yihiin dadka LEP xaaladaha dhifta ah ma macluumaadka aan micnaha lahayn;
- Ku siiyaan tababbar iyo hagitaan shaqaalaha shuruudaha marin-u-helka luqadda, sida marka loogu helo adeegyada luqadaha la heli karo; iyo
- La tashadaan kuwa dibaadda ee arrinta daneeya sidii mustaqbalaka loogu qorsheyn lahaa adeedyada luqadda.

Qaybaha ayaa horayba ugu hirgaliyay waxqabayadan intooda badan hawlahooda. Sifeynta waxqabadyada marin-u-helka luqadaha jira ama la qorsheeyay ayaa waxay ku jiraan lifaaqa Qorshaha LEP.

Macluumaadka La Xiriirka

Xubnaha dadweynaha ayaa waxay CRCL kala xiriiri karaan crcl@dhs.gov ama iyaga oo soo waca lambarrada hoosta ku yaal si ay u helaan macluumaad ku saabsan adeegyada luqadda iyo waxqabadyada la xiriira ee ka jira gudaha DHS.

CRCL ayaa dib-u-eegta oo qiimeysa macluumaadka khuseeya si xun ula dhaqanka xuquuda madaniga, iyo xoriyadaha madaniga, iyo ku sooca salka ku haya jinsiga, qowmiyadda, ama diinta, ee shaqaalaha ama mas'uuliyiinta Waaxda Nabad-Ilaalinta Dalka. Taas waxa ka mid ah macluumaadk khuseeya u-diidka marin-u-helka waxtarka leh ee barnaamijyada, waxqabadyada, ama adeegyada DHS sabatuna tahay aqoonta Ingiriisiga oo xaddidan.

Si uu ugu xereeyo cabasho CRCL, xubinta ka tirsan dadweynaha ayaa soo dejisan kara foomka cabashada la-buuxin karo oo e-mail ugu soo dir: crcl@dhs.gov, ama ku soo dir email sifeyn qoran oo faahfaahsan oo ah dhacdooyinka arrinta khuseysa.

Homeland Security

Cabashooyinka waxa lagu aqabalaa luqadaha aan ahayn Ingiriisiga:

- Dejiso foomka oo ah Ingiriisi *(PDF – 7 bog, 212 KB*
- إضغط لتحميل المستند باللغة العربية – Carabi *(PDF – 7 bog, 212 KB)*
- Cliquez ici pour télécharger ce formulaire en français – Faransiis *(PDF – 8 bog, 234.77 KB)*
- Klike la pou telechaje fòm sa a an Kreyòl Ayisyen – Haitian Creole *(PDF – 7 bog, 211.31 KB)*
- Clique aqui para fazer o download deste formulário em português - Bootiqiis *(PDF – 8 bog, 223.98 KB)*
- Щелкните мышью здесь, чтобы загрузить эту форму на русском языке – Af-Ruush *(PDF – 8 bog, 386.45 KB*
- 点击此处下载本表格的中文版 – Luqadda Shiinaha Fududeysan *(PDF – 7 bog, 434.82 KB)*
- Halkan riix si aad u soo degsato foomkan oo af Soomaali ah – Soomaali *(PDF – 8 bog, 219.88 KB)*
- Haga clic aquí para descargar este formulario en español – Isbaanish *(PDF – 7 bog, 209.31 KB)*
- Bấm vào đây để tải mẫu đơn này bằng tiếng Việt – Fiyetnaamiis *(PDF – 7 bog, 292.02 KB)*

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ku xereynta cabashada ee CRCL ayaa laga heli karaa www.dhs.gov/crcl ama adiga oo ugu wacaCRCL si toos ah taleefan lambarrada hoosta ku qoran.

Hababka kale ee lagu xereeyo cabashada ama lagula xiriiro CRCL:

- Boostada Mareykanka: (habkani wuxuu qaadanay illaa 20 maalmo shaqo meherad)
  Department of Homeland Security
  Office for Civil Rights and Civil Liberties
  245 Murray Lane, SW
  Building 410, Mail Stop #0190
  Washington, D.C. 20528
- Taleefanka:
  Agagaarka: 202-401-1474
  Taleefanka Lacag La'aanta ah: 1-866-644-8360
  TTYAgagaare (loogu talagalay dadka dhagaha wax ka qaba) : 202-401-0470
  Taleefan Lacag La’aanta ah TTY: 1-866-644-8361